

## Sicirrada tabarruca

Sicirka xubinimada Usdaw waxuu ka mid yahay kuwa ugu hooseeya dhaqdhaqaqa ururrada shaqaalaha, waxaana laga helaa faa'iidooyin iyo adeegyo xirfad leh oo heer sare ah kuwaasoo laga bixiyo xoogaa beni oo keliya maalintii.

Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho ama si aad Usdaw ugu biirto:

- La xiriir wakiilkaaga Usdaw
  - La xiriir xafiiska Usdaw ee xaafaddaada
  - Booqo bartayada internetka
- 0800 030 80 30**
- www.usdaw.org.uk**

Macluumaadka buugyarahen ku jira waa sax taariikhda la daabacayo – 04/2024.



Waxaa soo saaray Usdaw  
Voyager Building  
2 Furness Quay  
Salford Quays  
Manchester M50 3XZ

# Ma Waxaad Dareensan Tahay... Cidla?

**In aadan hubin xuquuqda  
aad shaqada ku leedahay?**

**In aad gargaar rabto si  
aad af Ingiriisiga u barato?**

**Usdaw ayaa ku caawin kara –  
waxaan nahay ururkaaga shaqaalaha.**



**Lix sababood oo ay ku fiican tahay in aad Usdaw ku biirto  
– ururkaaga shaqaalaha.**

# Lix sababood oo ay ku fiican tahay in aad Usdaw ku biirto...

- ➊ Wuxaan xubnahayaga ka caawinnaa in ay ka war helaan xuquuqda ay shaqada ku leeyihiin. Tusaale ahaan, miyaad ogayd in aad xaq u leedahay:
    - Musharka ugu yar ee qaangaarka. Waxuu kaasi kordhaa sanad walba oo tan iyo maalintii 1 Abriil 2024 waxuu tagnaas: £11.44 saacaddii dadka 21 jir ah ama ka weyn £8.60 saacaddii dadka da'doodu u dhixeyso 18-20 £6.40 saacaddii dadka da'doodu u dhixeyso 16-17
    - fasax mushaar leh oo 28 maalmood ah sanadkii (qofka shaqeeya 5 maalmood toddobaadkii).
    - nasasho 11 saacadood ah maalintii.
    - Shaqaalaha intooda ugu badan waxay xaq u yeeshaan musharka jirrada ka dib marka ay saddex maalmood bukaan.
  - ➋ Wuxaan aqbalnaa dhibaatooyinka xubnahayagu ka qabaan maamulka waxaanan kaaga doodnaa dhegeesiyyada edbinta.
  - ➌ Wuxaan xubnahayaga siinnaa talo iyo matalaad sharciyeed oo BILAASH ah haddii shil ka qabsado shaqada, si aanan caddaali ahayn loo eryo takoorna loo geysto.
  - ➍ Wuxaan xubnahayaga ka caawin karnaa in ay tababbar BILAASH ah ka helaan mawduucyo aad u kala duwan sida af Ingiriisiga, Xisaabta iyo xirfadaha kumbiyutarka.
  - ➎ Wuxaan u ololaynaa ka hortagga cunsurnimada waxaanan u doodnaa in shaqaalaha dhammaantood si isku siman loola dhaqmo.
  - ➏ Wuxaan ka shaqaynaa wanaajinta musharka xubnahayaga iyo nolosha ay shaqada ku leeyihiin.
- Qof walba ayaa urur shaqaale ku biirto kara.
  - Wuxaad sharci ahaan xaq u leedahay in aad urur shaqaale ku biirto.
  - Waajib kuguma aha in aad loo-shaqeeyahaaga u sheegto in aad urur shaqaale xubin ka tahay.
  - Waa sharci darro in qof adiga takoor kuugu geysto xubnimada aad urur shaqaale ugu jirto.